# Wixii ku dhaca Muslimka ee ah Rafaad ,Daal, Hami, Murug, Uur ku taalo iyo Dhibaato, xataa Qodaxda mudaysa, Ilaahay danbigiisuu ugu dhaafaa

Abii Saciid Alkhudriyi iyo Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: " Wixii ku dhaca Muslimka ee ah Rafaad ,Daal, Hami, Murug, Uur ku taalo iyo Dhibaato, xataa Qodaxda mudaysa, Ilaahay danbigiisuu ugu dhaafaa".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Wuxuu Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee cadeeyey waxa soo gaaraya Muslimka ee Jiro, Murugo, Walba haar iyo Dhibaatooyin kale ah sida: Cabsida, Gaajada, xataa Qodaxda mudaysa ee xanuujisa, waxaasoo dhan kafaara gud ayey u noqonayaan, Ilaahayna dambiyadiisuu kaga dhaafayaa.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3701